# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

### Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 12aad, Fadhigii 11aad

16 August 2025

**Quraanka:** Md. Shiikh SIciid Sokeeye

**Gudoonka: - Siciid Mire Faarax (Giire)**

**Ajandaha Fadhiga:-** *Warbixinta Wasaarada Macdanta iyo Tamarta Warshadaha ee Wax ka badelka Xeerka Tamarta Korontada*

**Gudoomiyaha:-** waxaynu soo dhowaynayanaa Wasiirka Macdanta iyo Tamarta si uu inoogu sharaxo muhiimada iyo baahida keentay in wax ka badel iyo kaabis lagu sameeyo Xeerkan Tamarta Kororntada, Mudane Wasiir ku soo dhawow.

**Md. Eng Ahmed Jaamac Wasiirka Wasaarada Tamarta iyo Korontada:-**"Bismilahi, Raxmaani, Raxiim; Shir gudoonka Golaha, xildhibaanada sharafta leh, shaqaalaha Golaha, warbaahinta qaranka iyo warbaahinta madaxa banaan ASC.

Mudanayaal maanta waa maalin taariikhi ah maadama oo halkan idiinku soo bandhigayno xeerka wax ka badalka iyo kaabista maamulka tamarta koranta JSL, Mudanayaal waxa ii Sharaf ah inaan hor tiina imaado, si aan u iftiimayo oo dul mar guud ugu sameeyo una sharaxo qabyo qoraalka xeerka korontada JSL.

Xeerkan waxa uu badalayaa xeerkii hore ee xeerka tamarta korontada ee Xr81/2012 ee golaha wakiiladu ansixiyeen sannadkii 2018 si uu ula jaanqaado xaalada maanta ee farsamo dhaqaale iyo bulsho isla markaana uu dalka u diyaariyo mustaqbal ku dhisan kabayaasha tamara casriga ah iyo nidaam sharci oo la jaanqadaya xeerarka caalamiga ah ee ku dhisan tamarta casriga ah.

Mudanayaal Somaliland waxa ay kamid tahay wadamada ugu qaalisan dhinaca tamarta koronta taas oo ay sabab u tahay arimo farsamo, sharci iyo duruufo dhaqaale ugaar ah dalkeena; dhanka kale waxa aynu ka mid nahay dalalka ugu qanisan tamarta cusboonaata qoraxda joogtada ah, dabaylaha xoogan, biyaha, qaaca dhulka hoostiisa, hydergine-ta cagaaran iyo mawjadaha badda oo intaba laga dhalin karo tamar cusboonata.

Fursadahani waxay u sahalayaan dalku inuu yeesho hanaan tamareed oo waarta una wanaagsan deeganka iyo koboca dhaqaalaha.

Sababaha wax ka badalka xeerka; xeerashu waxa ay yeeshaan gol doloolooyin, il duufyo iyo iska hor imaad soo baxa marka lagu shaqeeyo haddaba xeerka korontada Somaliland ee Xr 81/2018 ee hadda kaabista iyo wax kabadalka lagu sameynayo waxa uu ka koobnaa 9 cutub iyo 31 qodob kaas oo loogu talagalay inay hagaan nidaamyada tamarta korontada iyo xaqiijinta iyo hagida tamarta korontada qaranka JSL. Laakiin xeerkaa waxa ka soo

ifbaxay gol doloolyin sharci, madmadow iyo qodobo is khilaafsan oo ka hor imanaya xeerka kale ee dalka, cutubyo iyo qodobo muhiim ah oo ka maqnaa xeerka asalka xeerka oo lagu sameeyay makiisa horeba af ingriisi lana turjumay iyada oo aan si haboon loo hubin saxnaansha afka iyo sugnaanshaha luuqada somaliga ; sidoo kale sideedii sano ee ugu danbeeyay ee xeerkaa lagu shaqaynay

Waxa dalka ka dhacay horurmar farsmo oo balaadhan oo ku saabsan xaga korontada taas oo daruuri ka dhigaysa in xeerkani la jaanqaado isbadalkaas, mudanayaal dhamaan qodobada kor ku xusani waxay daruuri ka dhigayaan in kaabis iyo wax ka badal lagu sameeyo xeerka tamarta korontada JSL.

Mudanayaal xeerkani waxa uu soo maray marxalado tashi iyo diyaaar garaw qoto dheer anagoo ka faa'iidaysanay aqoonta khubaro ku xeel dheer tamarta sharciga dhaqaalaha iyo deegaanka waxa si balaadhan loola tashaday daneeyayaasha gudaha iyo dibedaba si loo hubiyo in xeerku ka turjumayo baahida baahida bulshada iyo himilada JSL.

Mudanayaal iyo marwooyin xeerkan cusub waxa uu ka koobanyahay 15 cutub, xeerkan cusub waxa uu leeyahay 94 qodob, kuwaas oo si faahfaahsan uga hadlaya

- Qodobada Guud iyo eray bixinta
- Doorka wasiirka iyo siyaasada JSL ee Tamarta
- Aasasida iyo nidaaminta koomishanka tamarta korontada
- Nidaaminta ruqsad siinta iyo kormeerkeeda
- Dhalinta, gudbinta, qaybinta iyo iibinta korontada
- Qiimeynta taariifada iyo adeeg korontada
- Xuquuqda iyo waajibaadka macaamiisha
- Koronto galinta miiga iyo reer guuraaga
- Tamarta cusboonaata iyo maalgashigeeda
- Xuquuq iyo ciqaabaha ka dhalanaya xadgudubka xeerkan

Mudanayaal waxyaabaha cusub ee xeerkan lagu soo kordhiyay waxa ka mid ah in la aasaasay Dhalinta, Gudbinta, Qaybinta iyo iibinta koronta dalka.

Hanaanka jaangoynta tacriifa ayaa ku jira oo lagu soo daray isagana; markaa dawladu waxay aasaasi doontaa shirkad ay iyadu leedahay oo gudbinta gacanta ku haynaysa mustaqbalkana dhalinta ka qayb gali doonta laakiin aan qaybinta ku faroglinayn ganacsatada; waxa kale oo lagu doo daray xuquuqda iyo waajibaadka macaashiisha, waxa lagu soo daray tayaynta qalabka korontada iyo kormeerka suuqa korontada.

Waxa kale oo lagu soo daray qodob kale oo koronto galinta reer miiga ah, waxa kale oo lagu soo daray adeegsiga tamarta cusboonata iyo beekhaaminteeda, intaa waxa dheer qodobo kale oo la xidhiidha maalgashiga iyo maalgalinta tamarta korontada oo muwaadiniinta iyo ajenebiguba maalgashan karaan.

Waxa kale oo lagu soo daray xalinta cabashooyinka iyo baadhista shilalka korontada; waxa kale oo lagu soo kordhiyay xeerkan danbiyada korontada iyo ciqaabta ka dhalanaysa.

Ujeedooyinka xeerka iyo faa'iidooyinkiisa; Mudanayaal ujeedoyinka xukuumada wadajir iyo wax qabad ay ka leedahay xeerkan waxa ugu muhiimsan:

1. In laga dhabeeyo himilada qaranka ee ah in la helo koronto jaban la awoodi karo la isku halayn karo isla markaana bad qabta
2. In dib u dhis iyo kaabis iyo hurmar balaadhanba lagu sameeyo suuqa korontada JSL
3. In la cadeeyo qaab dhismeedka suuqa korontada ee dalka oo waafaqsan hanaanka dhalinta, qaybinta ee rasmiga sidaynu kor ku soo dheegnay
4. In xeerku uu fududeeyo maal galinta aaga korotada ee ganacsatada dalka iyo dibedaba.
5. In si cad loo xuso xuquuqda iyo waajibaadka macaamiisha iyo shirkadaha bixiya adeega korontada
6. In si cad loo qeexo xilalka iyo masuuliyada xafiisyada dawlada ee ku hawlan arimaha korontada.
7. In xeerku si cad u tilmaamo hanaanka guud ee koronto gaadhsiinta miiga iyo reer guuraga.

Gebo gebadii Mudane Gudoomiye, Xildhibaandada sharafta leh xeerkan waa tiir muhiim ah oo kamida ah yoolka qaranka ee horumarinta Tamarta iyo kaabayaasha dalka, waxa uu shacabka Somaliland u horseedayaa tamar jaban oo bad qabta, la isku halayn karo isla markaana dhiirigelinaysa halbuurka dhaqaalaha, ganacsi iyo horumarka bulsho oo waara.

Waxaan ku rajo weynahay golaha sharafta leh inuu si mideysan u ansixin doono xeerkan si uu unoqdo haga mustaqal ifaya ee Qaranka Jahuuriyada Somaliland ee aaga korontada.

Wasalaamu calaykum.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ---------------------------------------------------- | -------------------------------------- |